رمضان شهر البر والصلة والتعرض لرحمات الله

Ramadaan waa bisha samafalka iyo xiriirinta iyo isudhigidda naxariista Alle

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(لَيْسَ الْبِرَّ أَنْ تُوَلُّوا وُجُوهَكُمْ قِبَلَ الْمَشْرِقِ وَالْمَغْرِبِ وَلَكِنَّ الْبِرَّ مَنْ آمَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَالْمَلَائِكَةِ وَالْكِتَابِ وَالنَّبِيِّينَ وَآتَى الْمَالَ عَلَى حُبِّهِ ذَوِي الْقُرْبَى وَالْيَتَامَى وَالْمَسَاكِينَ وَابْنَ السَّبِيلِ وَالسَّائِلِينَ وَفِي الرِّقَابِ وَأَقَامَ الصَّلَاةَ وَآتَى الزَّكَاةَ وَالْمُوفُونَ بِعَهْدِهِمْ إِذَا عَاهَدُوا وَالصَّابِرِينَ فِي الْبَأْسَاءِ وَالضَّرَّاءِ وَحِينَ الْبَأْسِ أُولَئِكَ الَّذِينَ صَدَقُوا وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُتَّقُونَ)

(**Samo falku ma aha inaad wajiga u jeedisaan qorrax ka soo bax iyo qorrax u dhac, laakin samafale waa ruuxii rummeeya Alle, iyo Qiyaame iyo malaa'igta iyo kitaabka (kutubta Alle), iyo nabiyada, oo siiya xoolaha isagoo jecel qaraabada, iyo agoonta, iyo masaakiinta, iyo musaafirka, iyo kuwa tuugsada qoor xureyn, oogana salaadda, bixiyana zakada, oofiyana ballankooda, markay ballamaan, oo ku adkeysta dhibka iyo rafaadka iyo waqtiga dagaalka, kuwaasina waa kuwa ka runsheegay Iimaankooda waana kuwa dhawrsada**), waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa.

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Bisha Ramadaan ee barakaysan waa bisha daacooyinka iyo naxariista, waa bisha soonka iyo salaadda iyo xiriirinta iyo kalgacalka, iyo isugu kaalmaynta samafalka iyo taqwada, waa bisha lagu imtaxaano muslinka sabarkiisa iyo ajar raadintiisa iyo cabsida uu ka cabsanayo Alle – *cazza wa jalla* –, qofka sooman wuxuu u adkeysanayaa gaajada iyo harraadka, naftiisana wuu celinayaa, dhibkana wuu ku sabrayaa, iyadoo ay u sii dheer tahay inuu Alle ugu dhowaado daacooyinka kala duwan, sida Quraan akhriska iyo digriga, iyo salaatulaylka iyo sadaqooyinka iyo heshiisinta dadka, iyo in la huro wax kaste oo dadka iyo dalka dan ugu jirto, taasna waxay ka mid tahay wanaagga uu addoonka naxariista Alle – *cazza wajalla* - ku helo, Ilaahay – *subxaanahu* – wuxuu leeyahay:

(إِنَّ رَحْمَتَ اللَّهِ قَرِيبٌ مِنَ الْمُحْسِنِينَ)

(**Naxariista Alle waxay u dhawdahay kuwa samaha fala**), rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

(إِنَّ هَذَا الْخَيْرَ خَزَائِنُ، وَلِتِلْكَ الْخَزَائِنِ مَفَاتِيحُ ، فَطُوبَى لِعَبْدٍ جَعَلَهُ اللَّهُ مِفْتَاحًا لِلْخَيْرِ ، مِغْلَاقًا لِلشَّرِّ ، وَوَيْلٌ لِعَبْدٍ جَعَلَهُ اللَّهُ مِفْتَاحًا لَلشَّرِّ ، مِغْلَاقًا لِلْخَيْرِ)

(**Khayrkan waa qasnado, qasnadahaasna fureyaal ayay leeyihiin, waxaa liibaan u sugnaatay addoon Ilaahay fure uga dhigay khayrka qataarna uga dhigay sharta, waxaa halaag u sugnaaday addoon oo Ilaahay sharta fure uga dhigay, khayrkana qataar uga dhigay**)

Bisha Ramadaan ee barakaysan waa goob loogu tartamo khayrka iyo samafalka, addoomaha ayaa ugu tartamo camalka baraxtiran iyagoo Alle - *cazza wajalla* – ugu dhowaanaya, nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – xaalkiisa bisha Ramadaan sidan ayuu ahaa Ibnu Cabbaas - *Ilaahay raalli haka noqdee* – waxaa laga wariyay inuu yiri:

(كَانَ رَسُولُ اللَّهِ (صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) أَجْوَدَ النَّاسِ ، وَكَانَ أَجْوَدُ مَا يَكُونُ فِي رَمَضَانَ حِينَ يَلْقَاهُ جِبْرِيلُ، وَكَانَ يَلْقَاهُ فِي كُلِّ لَيْلَةٍ مِنْ رَمَضَانَ فَيُدَارِسُهُ الْقُرْآنَ ، فَلَرَسُولُ اَللَّهِ (صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) أَجْوَدُ بِالْخَيْرِ مِنَ الرِّيحِ الْمُرْسَلَةِ)

(**Rasuulkii Alle - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu ahaa midka dadka ugu deeqsinimada badan, wuxuu ugu deeqsinima badnaa bisha Radamaan markuu Jibriil la kulmayo, wuxuu la kulmi jiray habeen kaste ka mid ah Ramadaan wuxuu la akhrisan jiray Quraanka, Rasuulka Alle - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu ka**

deeqsinimo badan yahay xagga khayrka dabeysha lasoo diray).

Ramadaan waa goobta samafalka, gaar ahaan quudinta cuntada oo ka mid ah astaamaha bishan qiimaha badan sidoo kale astaan ka mid ah astaamaha diinteena toosan, sayidkeena Cabdullaahi bin Salaam – *Ilaahay raalli kaha noqdee* – wuxuu leeyahay: markuu rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – uu yimid Madiina, dadka ayaa xaggiisa aaday waxaan ka mid ahaa dadka xaggiisa aaday, markaan arkay wejigiisa waxaan gartay inuusan ahayn weji beenlow waxaan maqlay isagoo dhahaya:

(أَيُّهَا النَّاسُ: أَطْعِمُوا الطَّعَامَ ، وَأَفْشُوا السَّلَامَ ، وَصِلُوا الْأَرْحَامَ ، وَصَلّوا وَالنَّاسُ نِيَامٌ ، تَدْخُلُوا الْجَنَّةَ بِسَلَامٍ)

(**Dadow cuntada quudiya, salaanta faafiya, qaraabadana xiriiriya, habeenkana tukada dadka iyagoo hurdaya, jannada nabad aad ku gashiinee**)

Hadalka nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - waxaa soo galaya afar arrimood seddex ka mid ah waxay ku saabsan yihiin xiriirka dadka dhexdooda, waa quudinta cuntada iyo faafinta salaanta iyo xiriirinta qaraabada, midda afaraad waxay ku saabsan tahay xiriirka addoonka iyo rabbigiisa, waa salaatulayl dadka iyagoo ay hurdayaan, nin ayaa

rasuulka weyddiiyay wuxuu ku yiri: islaamka kee ugu khayr badan, wuxuu yiri:

(تُطْعِمُ الطَّعَامَ ، وَتَقْرَأُ السَّلاَمَ عَلَى مَنْ عَرَفْتَ وَمَنْ لَمْ تَعْرِفْ)

(**Cunto ayaad quudinaysaa, waadna salaamaysaa qofka aad garanayso iyo qofka aadan garanayninba**).

Waxaa ku habboon qofka inuusan yaraysanin ama yasin wanaagga, ma oga camalka Alle – *cazza wajalla* - ka aqbalayo, nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu leeyahay:

(لَا تَحْقِرَنَّ مِنَ الْمَعْرُوفِ شَيْئًا ، وَلَوْ أَنْ تُعْطِيَ صِلَةَ الْحَبْلِ ، وَلَوْ أَنْ تُعْطِيَ شِسْعَ النَّعْلِ ، وَلَوْ أَنْ تُفْرِغَ مِنْ دَلْوِكَ فِي إِنَاءِ الْمُسْتَسْقِي ، وَلَوْ أَنْ تُنَحِّيَ الشَّيْءَ مِنْ طَرِيقِ النَّاسِ يُؤْذِيهِمْ ، وَلَوْ أَنْ تَلْقَى أَخَاكَ وَوَجْهُكَ إِلَيْهِ مُنْطَلِقٌ ، وَلَوْ أَنْ تَلْقَى أَخَاكَ فَتُسَلِّمَ عَلَيْهِ ، وَلَوْ أَنْ تُؤْنِسَ الْوَحْشَانَ فِي الْأَرْضِ ، وَإِنْ سَبَّكَ رَجُلٌ بِشَيْءٍ يَعْلَمُهُ فِيكَ ، وَأَنْتَ تَعْلَمُ فِيهِ نَحْوَهُ ، فَلَا تَسُبَّهُ فَيَكُونَ أَجْرُهُ لَكَ وَوِزْرُهُ عَلَيْهِ ، وَمَا سَرَّ أُذُنَكَ أَنْ تَسْمَعَهُ فَاعْمَلْ بِهِ ، وَمَا سَاءَ أُذُنَكَ أَنْ تَسْمَعَهُ فَاجْتَنِبْهُ)

(**wanaagga waxna haka yasin, xitaa haddii aad siinayso xiriirka xarigga, xitaa haddii aad siinayso maqaarka kabta, xitaa haddii aad wadaanta kaga shubayso kan waraabka soo doontay weelkiisa, xitaa haddii aad ka leexinayso waxa dadka jidka ku dhibaya, xitaa haddii aad la kulmayso walaalkaaga adoo weji furfuran, xitaa haddii aad walaalkaaga la kulmayso oodna salaamayso, xitaa haddii aad ku wehlinayso dhulka kan cidla dareemaya, haddii qof kugu caayo**

wax uu kaa og yahay adiga waxaas oo kale aad ka og tahay ha caayin, ajarkiisa adaa iska leh dambigiisana asaa korka laga saarayaa, wixii dhegtaada ka farxiyo inay maqasho ku dhaqan, wixii dhegtaada la xumaado ka fogow), wuxuu leeyahay rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(**عَلَى كُلِّ مُسْلِمٍ صَدَقَةٌ**) ، قَالَ: أَفَرَأَيْتَ إِنْ لَمْ يَجِدْ؟ قَالَ: (**يَعْمَلُ بِيَدِهِ فَيَنْفَعُ نَفْسَهُ وَيَتَصَدَّقُ**)، قَالَ: أَفَرَأَيْتَ إِنْ لَمْ يَسْتَطِعْ أَنْ يَفْعَلَ؟ قَالَ: (**يُعِينُ ذَا الْحَاجَةِ الْمَلْهُوفَ**)، قَالَ: أَرَأَيْتَ إِنْ لَمْ يَفْعَلْ؟ قَالَ: (**يَأْمُرُ بِالْخَيْرِ أَوْ بِالْعَدْلِ**)، قَالَ: أَفَرَأَيْتَ إِنْ لَمْ يَسْتَطِعْ أَنْ يَفْعَلَ؟ قَالَ: (**يُمْسِكُ عَنِ الشَّرِّ؛ فَإِنَّهُ لَهُ صَدَقَةٌ**).

(**Qof kaste muslin ah sadaqo ayaa laga rabaa**), wuxuu yiri: ka waran hadduusan helin? Wuxuu yiri: **(gacantiisa ayuu ku shaqaysanayaa naftiisa ayuuna anfacayaa wax buuna sadaqaysanayaa**) wuxuu yiri: ka waran hadduu awoodi waayo inuu sameeyo? Wuxuu yiri: (**wuxuu u kaalmaynayaa midka baahan oo dibban**) wuxuu yiri: ka waran hadduuna samaynin, wuxuu yiri: (**khayr buu farayaa ama cadaalad**) wuxuu yiri ka waran hadduu awoodi waayo inuu sameeyo? Wuxuu yiri (**sharta ayuu ka harayaa sadaqay u noqonaysaa**).

Waxaan adkaynaynaa samafalka inuu yahay magac kulminayo wanaag oo dhan, iyo fal kaste Alle – *cazza wajalla* – raalligalinaya oo dadkana wax u taraya, waxaas oo dhan waxay ku jiraan dhaqanka fiican, sidaas awgeed nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu yiri:

(**الْبِرُّ حُسْنُ الْخُلُقِ**)

(**Samafalka waa dhaqanka fiican**)

Sidoo kale oofinta iyo qirashada loo qiranayo dadka fadliga leh waa dabeecad asal ah oo aan ku dhaqmin dadka bilista mooyee, maxaa ka fiican qofki yiri:

إن الوفاء على الكريـم فريضـة * واللؤم مقـرون بـذي الإخـلاف
وترى الكـريم لمن يعاشر منصفًا وترى اللئيـم مجانـب الإنصـاف
*

Oofinta qofka fiican waajib bay ku tahay * xumaantana waxay la xiriirtaa kan ballanta buriya

Waxaad arkaysaa kan wanaagsan inuu u garsooro qofka uu la dhaqmayo *

qofka xunna waxaad arkeysaa asoo ka fog garsoorka.

Mid kale wuxuu leeyahay:

إن الكرام إذا ما أيســـروا ذكروا * من كان يألفهم في المنزل الخشن

Dadka wanaagsan markay wax helaan way xusuustaan * qofkii ku ku jeclaa gurigii qallafsanaa.

Waxa ugu weyn wanaagga iyo xiriirinta iyo is xiriirinta ehelka iyo qaraabada iyo deriska iyo dadka oo dhan, taas waxay ka mid tahay waxyaalaha isku xirnaanta keena oona faafiya isu naxariisashada dadka dhexdooda, Ramadaan boos ugama bannaana is nacaybka iyo dadka is neceb, haddii Ramadaan uu yahay bisha xiriirinta

waxaa ugu horreeya xiriirinta labo arrimood: xiriirinta qaraabada, nabigana - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuu ku caddeeyay xadiis qudsiga meesha ay taagan tahay qaraabada kaasoo uu ka warinayo rabiga cisada leh – *subxaanahu* -:

(أَنَـا اللَّهُ، وَأَنَـا الـرَّحْمَنُ، خَلَقْتُ الـرَّحِمَ ، وَشَـقَقْتُ لَهَـا مِنِ اسْمِي، فَمَنْ وَصَلَهَا وَصَلْتُهُ، وَمَنْ قَطَعَهَا بَتَتُّهُ) ،

(**Anigaa Alle ah anigaa naxariisbadne ah qaraabada ayaan abuuray, magacayga ayaan kasoo faliiqay qofkii xiriiryo waan xiriirinayaa qofkii gooyana waan jarayaa**), kaddib nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu yiri: akhriya haddaad rabtaan oraahda Alle:

(فَهَلْ عَسَيْتُمْ إِنْ تَوَلَّيْتُمْ أَنْ تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ وَتُقَطِّعُوا أَرْحَامَكُمْ * أُولَئِكَ الَّذِينَ لَعَنَهُمُ اللَّهُ فَأَصَمَّهُمْ وَأَعْمَى أَبْصَارَهُمْ * أَفَلَا يَتَدَبَّرُونَ الْقُرْآنَ أَمْ عَلَى قُلُوبٍ أَقْفَالُهَا)

(Amaad mudan tihiin haddaad jeedsataan inaad fasaadisaan dhulka, qaraabadiinana aad goysaan * kuwaasi waa kuwa Alle lacnaday, dhagaha iyo Indhahana tiray * miyayna Quraanka fiirfiirinin mise quluubtoodaa ayaa qufulo saaran). Nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

(تُعْرَضُ الْأَعْمَالُ فِي كُلِّ اثْنَيْنِ وَخَمِيسٍ، فَيَغْفِرُ اللهُ فِي ذَلِكَ الْيَوْمَيْنِ لِكُلِّ امْرِئٍ لَا يُشْرِكُ بِاللهِ شَيْئًا إِلَّا امْرَأً كَانَتْ بَيْنَهُ وَبَيْنَ أَخِيهِ شَحْنَاءُ، فَيُقَالُ: اتْرُكُوا هَذَيْنِ حَتَّى يَصْطَلِحَا) .

(acmaasha waxaa lasoo bandhigayaa isniin iyo khamiis kaste, Alle wuxuu u dhaafayaa labadaas maalmood qof kaste aan Ilaahay wax la wadaajinin, qof mooyee oo isaga iyo walaalkiisa cadaawad ka dhexeysa, waxaa la dhahayaa labadan iska dhaafa ilaa ay ka heshiinayaan).

Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu ka dhigay xiriirinta qaraabada inay ka mid tahay tiirarka iimaanka oo uu ugu yeeray nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - bilowga soosaaritaankiisa, Camr bin Cabsa – *ilaahay raalli haka noqdee* - waxaa laga wariyay inuu yiri: Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - ayaan usoo galay – wuxuu ula jeedaa bilowga nabinimada -, waxaan ku iri: maxaad tahay, wuxuu yiri: **(Nabiga Ilaahay**), waxaan ku iri: maxaa laga wadaa nabiga Ilaahay?, wuxuu yiri: (**rasuulkii Alle**), waxaan ku iri: ma Allaa kusoo diray?, wuxuu yiri: (**haa**), waxaan ku iri: muxuu kula soo diray, wuxuu yiri: (**in Ilaahay la mideeyo oo aan wax lala wadaajinin**, **sanamadana la jabiyo, qaraabadana la xiriiriyo**), wuxuu ka dhigay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - astaan ka mid ah astaamaha iimaanka, wuxuu yiri:

(وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَاليَوْمِ الآخِرِ فَلْيَصِلْ رَحِمَهُ)

(Qofka rummeysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro ha xiriiriyo qaraabadiisa), waxaana sugtay arrintaas Alle oraahdiisa:

(وَأُوْلُواْ الأَرْحَامِ بَعْضُهُمْ أَوْلَى بِبَعْضٍ فِي كِتَابِ اللهِ)

(Qaraabadaana qaarkood qaar ku mudan yahay xukunka Alle).

Dhinaca kale xiriirinta waa inaad xiriirisaa qof kaste kuu dhow, qofna ha jarin, nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

(لاَ يَحِلُّ لِرَجُلٍ أَنْ يَهْجُرَ أَخَاهُ فَوْقَ ثَلاَثِ لَيَالٍ، يَلْتَقِيَانِ: فَيُعْرِضُ هَذَا وَيُعْرِضُ هَذَا، وَخَيْرُهُمَا الَّذِي يَبْدَأُ بِالسَّلاَمِ)

(**uma bannaana qof inuu ka caroodo walaalkii wax ka madan seddex habeen, way kulmayaan midkanna wuu jeedsanayaa kanna wuu jeedsanayaa waxaa ugu khayr badan kan salaanta bilaabaya**), taas macanaheeda ma aha inuu salaanta ku bilaabo markuu jidka kula kulmo keliya, ee waa salaanta macanheeda guud, waa inay ahaataa nabadgelyo dhab ah, ee ma aha afka in layska salaamo, qalbigana layska naco, waa salaanta nafta saaxiibka, ehelka, deriska, kan isku meel aad joogtaan, iyo insaanka, xayawaanka, manoolaha, koonka oo dhan, Alle wuxuu leeyahay:

(يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا ادْخُلُوا فِي السِّلْمِ كَافَّةً وَلَا تَتَّبِعُوا خُطُوَاتِ الشَّيْطَانِ إِنَّهُ لَكُمْ عَدُوٌّ مُبِين)

(Kuwa xaqa rumeeyow gala Islaamka dhammaan (kuna camal fala) hana raacina waddooyinka shaydaanka, wuxuu idiin yahay col cade)

Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Walaalaha islaamka ahow:

Xigmadda Alle – *cazza wajalla* – waxay keentay inuu uga dhigay tobanka dambe ee bisha Ramadaan fursad qofka wanaagga sameeya si uu u siyaadsado khayrka, kan ka gaabiyayna si uu u haleelo wixii ka tagay, waa maalmo oo barakooyinka Alle ay ka buuxaan iyo siismooyin rabbaani oo ilaahay – *cazza wajalla* – ku galladaystay addoomihiisa, waxaa ku habboon qof kaste muslin ah

inuu u banbaxo naxariista Alle – *cazza wajlla* – nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu leeyahay:

(إِنَّ لِرَبِّكُمْ فِي أَيَّامِ دَهْرِكُمْ نَفَحَاتٍ ، فَتَعَرَّضُوا لَهَا ؛ لَعَلَّ أَحَدَكُمْ أَنْ يُصِيبَهُ مِنْهَا نَفْحَةٌ لَا يَشْقَى بَعْدَهَا أَبَدًا)

(Rabbigiina – cazza wajalla – wuxuu ku leeyahay maalmaha waqtigiina barakooyin ee u banbaxa, waxaa laga yaabaa midkiina inay soo gaarto barako oo kaddibna waligiisa uusan hoogi doonin), sidaa awgeed nabiga - naxariis *iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu ku gaaryeeli jiray tobanka dambe ee Ramadaan cibaado badan iyo daaco, iyo in la aado xagga Alle - *cazza wajalla* -.

Waxaa ka mid ah arrimaha ay habboon tahay inaan ku dadaalno nooleynta tobanka dambe ee Rmadaan:

Dadaalka soojeedka habeenka, iyadoo lagu dayanayo rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu ahaa nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - mid ugu dadaalo tobankan si uusan ugu dadaalin habeennada kale, Caai'sha - *Ilaahay raalli haka noqdee* – waxaa laga wariyay inay tiri:

(كان رسول الله (صلى الله عليه وسلم) إذا دخل العشرُ شدَّ مئزرَه ، وأحيَا ليلـه ، وأيقظَ أهلَه)

(**Rasuulka Alle - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee – marka tobanka la gaaro hoosguntigiisa ayuu dhuuqsan jiray, habeenkana wuu soo jeedi jiray,**

reerkiisana wuu kicin jiray), waxaa kaloo laga wariyay inay tiri:

(كَانَ رسول الله (صلى الله عليه وسلم) يَخْلِطُ فِي الْعِشْرِينَ الْأُولَى مِنْ نَوْمٍ وَصَلَاةٍ، فَإِذَا دَخَلَتِ الْعَشْرُ جَدَّ وشَدَّ الْمِئْزَرَ)

(**Rasuulkii Alle wuxuu ahaa labaatanka hore mid isku dara salaad iyo hurdo, marka tobanka la gaaro wuu dadaali jiray hoosguntigana wuu dhuuqsan jiray**),
Ilaahay – *tabaaraka wataacaalaa* - wuxuu ku gaaryeelay tobanka dambe ee Ramadaan habeen ka mid ah habeennada ugu waaweyn uguna fadli badan, waa habeenka laylatulqadarka, asoo karaameynaya umadda nabi Muxamed - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - Mujaahid waxaa laga wariyay – in nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - uu sheegay nin reer Banii israa'lil ka mid ah inuu hub u qaatay dar Alle kun bilood, wuxuu yiri: muslimiinta ayaa la yaabay arrintaas wuxuu yiri: Ilaahay wuxuu soo dejiyay:

(إِنَّا أَنْزَلْنَاهُ فِي لَيْلَةِ الْقَدْرِ * وَمَا أَدْرَاكَ مَا لَيْلَةُ الْقَدْرِ * لَيْلَةُ الْقَدْرِ خَيْرٌ مِّنْ أَلْفِ شَهْرٍ * تَنَزَّلُ الْمَلَائِكَةُ وَالرُّوحُ فِيهَا بِإِذْنِ رَبِّهِمْ مِنْ كُلِّ أَمْرٍ * سَلَامٌ هِيَ حَتَّى مَطْلَعِ الْفَجْرِ)

(**Annagaa soo dajinay Quraanka habeenka Laylatulqadarka ah * maxaa ku ogeysiiyay Laylatulqadarka * waa habeen ka khayr badan kun bilood * waxaana soo daga malaa'igta iyo Jibriil**

habeenkaas idanka Ilaahay dartiis iyo amarkiisa * waana habeen nabadgalyo inta waagu ka baryo), cibaadada habeenkan si ikhlaas leh waxay gaaraysaa in lagu jihaado jidka Ilaahay muddo kun bilood ah.

Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu sheegay in la tukado habeenkan ay sabab u tahay dambidhaafka, wuxuu leeyahay –

(مَنْ قَامَ لَيْلَةَ الْقَدْرِ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ)

(**Qofkii habeenka laylatulqadarka u istaago iimaan iyo ajar raadis waxaa loo dhaafayaa wixii hormaray dambigiisa**).

Waxaa laga rabaa muslinka inuu ku dadaalo soo jeeditaanka habeenkan qiimaha badan, Alle – *cazza wajalla* – asoo u dhowaanaya, damacna ka leh inuu dambiga u dhaafo, nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu nagu boorriyay inaan ka raadino laylatulqadarka tirada kisiga ee tobanka dambe, karamka Ilaahiga iyo siismada badan awgeed, wuxuu leeyahay rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(تَحَرَّوْا لَيْلَةَ القَدْرِ في الوتْرِ مِنَ العَشْرِ الأوَاخِرِ مِنْ رَمَضَانَ) ، وفي رواية : (التَمِسُوهَا فِي العَشْرِ الأَوَاخِرِ مِنْ رَمَضَانَ –لَيْلَةَ القَدْرِ- فِي تَاسِعَةٍ تَبْقَى ، فِي سَابِعَةٍ تَبْقَى ، فِي خَامِسَةٍ تَبْقَى).

(**Ka raadiya laylatulqadarka tirada kisiga tobanka dambe ee Ramadaan**) riwaayo waxaa ku sugan: (**ka raadiya tobanka dambe ee Ramadaan –**

laylatulqadarka – habeenka sagaalka ay dhici karto habeenka toddobada ay dhici karto habeenka shanta ay dhici karto).

Camalka fiican kan ugu muhimsan habeennadan waa bixinta daqarsoonka oo ah mid dahirinayo kan soomaan una ah cunto dadka saboolka iyo masaakiinta, Ibnu Cabbaas - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - waxaa laga wariyay inuu yiri:

(فَرَضَ رَسُولُ اللهِ (صلى الله عليه وسلم) زَكَاةَ الفِطرِ طُهرَةً لِلصَّائِمِ مِنَ اللَّغوِ وَالرَّفَثِ ، وَطُعمَةً لِلمَسَاكِينِ ، مَنْ أَدَّاهَا قَبلَ الصَّلَاةِ فَهِيَ زَكَاةٌ مَقبُولَةٌ ، وَمَن أَدَّاهَا بَعدَ الصَّلَاةِ فَهِيَ صَدَقَةٌ مِنَ الصَّدَقَاتِ) .

(**Rasuulka Alle - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu waajibiyay daqarsoonka oo ka dahirinaya kan sooman hadalka xun iyo hadalka macandaran, wuxuuna u yahay cunto dadka masaakiinta, qofka guto salaadda ka kahor waa sako laga aqbalayo, qofka guta salaadda kaddibna waa sadaqo ka mid ah sadqooyinka**),

Waxaa ka mid ah in ducada lagu dadaalo, haddii ay tahay ducada bisha Ramadaan mid u dhow in la aqbalo tabanka dambe ayaa kaga sii dhow, waxaa laga wariyay Caa'isho inay tiri: waxaan ku iri rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - : rasuulkii Allow haddaan ogaado habeenka laylatulqadarka maxaan dhahaa? wuxuu yiri: dheh:

(اللَّهُمَّ إِنَّكَ عَفُوٌّ كَرِيمٌ تُحِبُّ الْعَفْوَ فَاعْفُ عَنِّى)

(Ilaahayow waxaad tahay mid cafis badan oo deeqsi ah cafiskana waad jeceshay i cafi).

Aan ku dadaalno sidaan uga faa'idaysan lahayn maalmahan fadliga leh, iyo habeenka barakeysan digri iyo duco iyo akhriska Quraanka, waxkastoo Alle – *cazza wajalla* - noo dhoweynaya, si aanan u noqonin kuwa waayay naxariista Alle, qofkii habeenkan wax waayo si dhab ah ayuu wax u waayay, nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay: **(…waxaa ku sugan habeen ka khayr badan kun habeen qofkii khayrkiisa waayo wax kastuu waayay …**)

Ilaahayow waxaad tahay mid cafis badan oo deeqsi ah cafiskana waad jeceshay na cafi